



Waalidku sidoo kale wuu Tiriya Ku caawinta ilmahaaga – Maskax wax ka xisaabinta

Xisaabta aan badanaa aan sameyno maalin kasta, waxaan ka sameynayaa maskaxdeena. Xisaabta qaarkeed waxaan dareenaa inaan u baahan nahay isticmaalida warqad iyo qalin ama xasaabiye. Haddana markaan ciyaareyno ciyaarta shiishka gamuunka ama kaadhahka ama aan daawano cayaaraha naadiyada, waxaan isku haleynaa wax ka xisaabinta maskaxda. Intee dhibcood baa loo baahan yahay si ay ku guuleystaan?

Safrida, qaybsiga biil, wax soo gadashada, ciyaarida ama daawashada cayaaraha iyo diyaarinta cuntada dhammaan waxay ku lug leeyihiin maskax ka xisaabinta. Hababka aan isticmaalno markaan wax ka xisaabineyno maskaxda ma aha isku hab aynu isticmaalno markaan qoreyno wadarta xisaabta.

Nidaamka ku lugta leh ee maskax ku xisaabinta waxay ku noqotay mucjiso carruur badan iyo xitaa waalid badan. Ka shaqeynta 998 x 3 waa shaqo adag, xitaa markaad isticmaaleyso qalin iyo warqad, haddii aadan garan inaad jawaabta ku heli karto maskax ahaan adoo 6 ka goynaya 3000.

Saa daraadeed sidee baa carruurta ku bartaan maskax wax ku xisaabinta?

Carruurta waxay bilaabaan iyagoo tirinaya waxyaalaha ay arkaan, oo isticmaalaya alaab si ay wax ugu daraan ama uga gooyaan. ku celcelin ka dib carruurta waxay bilaabi doonaan inay ka fekeraan siyaalaha ay wax isugu dari lahaayeen una kala goyn lahaayeen iyagoon isticmaalin alaab. Mid ka mid hababkii ugu horeeya ee ay carruurta ku bartaan inay isku daraan laba lambar maskax ahaan waxaa weeye inay bilaabaan lambar weyn oo ay u tiriyaan mid mid si ay ugu daraan lambarka labaad. Tan ayaa ah hab wax ku ool ah marka laysku darayo lambarada yar yar. Islamarka ay carruurta bilaabaan lambarada waa weyn, waxay sameystaan siyaalo kala duwan oo aan ahayn mid mid u tirinta.

Tusaale, si aad u hesho jawaabta $25 + 89$, carruurtu waxay sameyn karaan:

- Ka dhig 89 ilaa 90, ka dib ku dar 10 ka dibna 14
- Isku dar 20 iyo 80 si aad u hesho 100, ka dib ku dar 9 iyo 5, ka dibna ku dar 100 iyo 14
- Ku dar 10 laba jeer 89 ka dibna ku dar 5 kale.

Mid ka mid ah waxyaalaha ugu xiisaha badan ee ku saabsan maskax ka xisaabinta waxaa weeye dhammaanteen isku si uma fekerno.

Maxaad ku sameyn kartaa guriga?

- Weydii ilmahaaga siday/siduu uu u helay jawaabta su'aasha. U sharax sidii aad maskax ahaan adigu jawaabta ku heli laheyd. Haddii uusan ilmahaagu maskax ahaan jawaabta heli karin, sii isaga ama iyada alaab uu u isticmaalo tirada.
- Weydii ilmahaaga inuu ka shaqeeyo inta sarifka ah ee uu/ay helayso markay/uu bixineyo lacagta shay dukaamada aad ka soo gadateen.
- Haddii ilmahaagu uu lacag u kaydsanayo si uu shay u soo gato, weydii intee lacag ah ayuu u baahan yahay/tahay inuu/inay kaydiso ka hor intuu soo iibsaa.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu qiyaaso kharashka laba shey markaad wax soo gadaneysaan.
- Markaad ciyaareysaan ciyaar isticmaasha laba laadhuu, ku bedel laadhuuda leh dhibicda kuwo lambaro leh.
- Haddii aad daaweysaan ciyaar ku lug leh laba kooxood, weydii ilmahaaga inuu maskaxaan uga shaqeeyo inta u dhaxeysa dhibcahooda.
- Ha ku lug yeesho ilmahaagu kharashka la xirriira safar fasaxeedka. Tusaale, *waxaan joogi doonaa shan habeen kharashka habeenkiina waa \$70.*

